UNDERVISNINGS
MINISTERIET



# Waxbarasho -Mustaqbalka caruurtaada

**Waxbarasho – Mustaqbalka caruurtaada**

© Copyright: Wasaarada Waxbarashada, 2014

Wadashaqaynta wasaarada shaqaalaha

Qoraa: Schultz

Design: Falk iyo musen

Sawiro: Jakob Dall: dhinac 13, 39, 43 og 44
Ulrik Jantzen: dhinac 23, 24, 27, 52
Lars Skaaning: Wixii sawiro ah oo dhan

Ilo: Dhaqaalaha sogalka dhinaca 16-36:DA's
Qiyaasta structure ah 2013 iyo wasaarada shaqaalaha iyo shaqo galinta

Mashruucan ka yimid waxsoosaarida dhinacawasaarada waxbarashada: Information ku socda walidiinta kuna saabsan waxbarashada sare ee Denmark, 2008

Xigashooyin (Talo wanaagsan) kana yimid interview oo uu qaaday Schultz sanadkii 2014

ISBN 978-87-603-3023-0 waxbarashada – mustaqbalka caruurtaada (qaybta daabacan)
978-87-603-3024-7 waxbarashada – mustaqbalka caruurtaada (www-ku darsan)

Waxaad kala soo bixi kartaa uvm.dk iyo ug.dk

Soo daabacay: Rosendahls – Schultz Grafisk

Lagu print gareeyey Denmark 2014

# Contents


Hore u soco 3

Caruurtaada waa inay dooran karaan tacliintooda 4

Hagitaan iyo caawinimo 6

Tacliinta dhalinyarada 8

Tacliin sare – Waxbarasho ku saabsan shaqada 12

Dhalinyarada way helikaraan tacliin sare 16

Dugsi sare iyo HF – waxay kuu sii sahlaysaa waxbasho badan 37

Waxbarashada kale iyo siihagaajinta tacliinta 46

# Hore u soco

**-Muhiim weeye inuu caruurta wax bartaan**

Qayb weyn ayaad ku leedahay caruurtaada markay dooranayaa tacliinta u wanaagsan klass ka 9 laad ka dib. Aad ayey muhiim u tahay inaad ka caawiso waxay ay doonayaan mustaqbalkooda inay bartaan ayna ayna xiisaynayaan tacliintaa. Talo wanaagsan sidaad u siin lahayd oo uga talin lahayd tacliimaha badan ee wadanka laga barto.

Markaa, halkan waxaanu doonaynaa inaan adiga (waalidka) anaanu aad kuu caawino si aad caruurtaaa sidii talada ugu wanaagsan aad u siin lahayd.

Denmark waxaa ay u baahantahay arday wanaagsan, waxbarasho kasta ba ha ahaato, sanadadii la soo dhaafay, nasiib xumo, waxaad moodaa ardayda inaynan waxbarashada sii wadan iyo sida ardayda loogu baahanyahay ayaad moodaa inaynan is lahayn. Taasoo aad looga xumaaday marka la eegay tacliinta wadanka taala.

Waa in ardayda la xujeeyaa, si ey waxbarashada isku taxaluujiyaan. Waa in professionalkooda laga itaxaamo, si aad adiga iyo carrurtaadaba u ogaataan marka aad tacliinta kala duwan ee wadanka taala u dooranlaheydeen.

Wax yar uun baani idin caawin yaraynaa si aanu idiinku kala sheegno inta nooc ay waxbarasha u kala baxdo.

Faah faahin kalena hadaad u baahantahay kala xiriir ug.dk , evejledning.dk ama UU-center

Nasiib wanaagsan

Ka timid

Christine Antorini iyo Henrik Dam Kristensen
Wasaarada waxbarashada — Wasaarada shaqada





# Carurtada waa inay tacliin dortan

Waa muhiim inaad wax barato. Tacliinta waxyaabo aad u farabadan ayey naftaada u taraysaa, Shaqo wanaasan iyop mushahar ku qanciya sidaad u heli laheyd. Cilmigana nafsiyan iyo maskaxiyanba aad ayuu ugu wanaagsanyahay.

Hadii aad walid tahay, aad bay carurtaada muhiim ugu tahay inaad caawiso, taasina waxaa ay keenaysaa inaad adiga aad fahanto waxa uu jecelyahay iyo shaqada uu howdhow ka shaqaynayo. Waxbarashadana waa inay noqotaa mid jacayl iyo xiiso ay u hayaan, tasina waxaa ay ka caawinaysaa si ey hadhow ugu fududaato waxbarashadaas.

Caado biliaadanka leeyahay weeyey inaad caruurtaada tacliin wanaagsan ey helan. Khasabna ma aha inay tacliin sidaa u sii wanaagsan ey helaan si eynan hadhow u niyad jabin. Bilaa taclina inay noqdaan ma aha. Mustaqbalka si uunan inankaaga ama inantada eynan shaqo mustaqbalka ah aad ugu adkaan, oo waad inaad isku misaantaa.

**Sharuudo ku saabsan caruurta**
Sharuudo waa in lagu xidhaa caruurta. Waa inay glaska marwalba joogaan, eyna active noqdaan, inuu fakarkooda aad u dheeraadaa. Tacliintaasina waa inay noqotaa mid itixaano leh iyo dadaal aad u badan uu wali sii muujiyo dalaal kala duwan oo ah mid group iyo mid guriga ah ba.

Waa dadaal weyn si ay waxbarasho u helaan. Tageero walid aad bay muhiim ugu tahay dhalintarada ayna.

**Dhalinyarada wey soo korayaan**
Dhalinyarada way soo korayaan, oo ayaaga mardhow masuul iska noqonaya. Mustaqbalkooda ayey ku mashquulayaan, si ay qeyb uga qaadanlahayeen saaxibadood iyo aduunkaba. Masuulnimo badan ayey iska qaadayaan, ey tacliintana ku jirto.

Tacliin iyo shaqo wey isku xidhanyihiin:

- Yaan ahay?
- Yaan doonayaa inaan noqdo?
- Maxaan doonayaa inaan noqdo?

Tacliintu waa nuur iyo farxad Dhalinyaro noqo. Facaa la mid noqo, halkaas oo ay xirfadda caawinaysaa si loo qaabeeyo.

**Wakhti la qaado caruurtaada**
Wax ka wanaagsan ma jirto markaad wakhti isku heshaan ey noqoto marakaad tacliintooda ka caawinayso.



Waqtiga
- Waxay carurtada xisaynayan ka dhagayso
- Waydii inuu shaki ku jiro,
- u cadee waxey ku wanaagsanyihiin
- Talo wanaagsan sii,
- Waxyabaha aad ku kala duwantihim ka hadla
- Jawab u raadi shakiga si aad uga saarto,
- Cawino raadsada waxaad jawaabi weydaan.
- Waxbarashada kala duwan raadi, kadibana waxbarashaas shaqooyinka lagu helikaro soo raadi
- Ka wada hadla sida ugu wanagsan uu ku najaxilahaa.

## Waxbarashada waa nolol

Fursad iyo mushahar aad u wanaagsan ayaad lahaanaysaa hadaad tacliin leedahay. Waana rayi aad u wanaagsan hadaad doonayso inaad kaligaa shaqaysato.

Wakhti ayey qaadankartaa si aad u hesho tacliin, waqtina way qaadanaysaa tacliintaas. Laakiin waa maal galin aad adiga is maal galinayso.

Intaas oo ku oo waxbarasho ayaa jira. Markaan waxaa jira fursado aad u badan mustaqbalka.

**Qoraalkan wuxuu sharaxayaa noocyo kala waxbarasho duwan iyo sidaad u isticmaalikarto. Faahfaahin intaa sii dheer, hoos usii soco.**

# Tilmaamaha iyo caawinaad

Dhalinyarada isku wadamid maha, shaqooyinkana waa sodoo kale. Waa muhiim waa in laga fakaro fursadahaas kala duwan intaadan go'aan qaadan. Waxbarashadu waa fursada ugu wanaagsan ee kuu ogolaankarta mustaqbal wanaagsan noloshaada. Waxbarashadu waxaa ay dhalinyarada u qabanaysaa ama ufuraysaa albaabo kala duwan dhalinyarada si ey u isticmaalaan khibradooda ama xirfadahaooda kala duwan.

Waa inay marka hore helaan waxa uu qofka dhalinyarada ah uu doonayo. Sidaa darteed waa inuu helaa qof la taliya ama uu baadha internetka

**Tilmaamaha iskulka ku yaala**
Carurta waxay waxbarashada ka bartaan inay iskuulka hoose dhiganayaan. Laga bilaabo glaska 7'aad, eyey la kulmaan macalin la taliya waxbarashada oo ka yimid (UU) oo kala taliya waxbarashada dhalinyarada markay ka baxaan glaska 9 ama 10'aad. UU-wuxuu waliba caawiyaa waalidka, u shiriyaa waalidiinta habeenimada, si u idiinku sheego ama idinkula taliyo caruurtiina mustaqbalkooda.

**UU waa Lataliye dhilinyarada waxbarashadooda. UU- waa qof profesionalkiisu uu yahay ama tacliin sare u leh waxbarashada iyo shaqooyinka.**

Arday qaarkood ayaa u baahan cawino dheeraad ah, waxaad kala xiriiri kartaan UU-lataliyeha ardayda oo aad weydiinkartaa macluumaadka aad doonto.

**e-lataliye**
Yar iyo weynba talo wey ula tagikaraan E-lataliye, dhaqso ku hel su'aalahaaga ku saabsan waxbarasho iyo shaoba. Soo wac ama chat ama emailba u so dir. E-lataliye waxad helaysaa casarkii iyo weekendka.

Bal eeg evejledning.dk

**Ka aqri waxbarasho iyo shaqo ug.dk**
Lataliyaha waxbarashada ee ug.dk, Ka aqri kana doro waxbarashada kala duwan iyo shaqoyinka. Halkan waxaad ka heleysaa maclumad gooban oo dhamaystiran. Ka aqri sharudaha galitanka, mushaharada,iyo shaqooyinka Waxbarashada kadib. Skoleka websitekiisa ayaad macluumaad intaa ka badan ka heli karaysaa.

Halkan ka eeg ug.dk.

**Dhalinyarada markay qarar gaadhaan**
Skoleka dhalinyarada marwalba waxaa aad ka helaysaa lataliye ardayda, oo kala talinaya mustaqbalkoda ha noqoto doorasho waxbarasho ah ama shaqo ah. Iskolo qaarkood waxaa jooga arday la taliye, shaqalaha bulshada ama hanuuniye yaal. Meel walba ha noqoto, dhalinyarada caawinimo marwalba iskoolada wey ka heleyaan hadii ey cawinimo u baahdaan.

**Carurtaada ma qarar gaari la yihiin?**
Carurtaada waxbarashadii miyey sii wadi waayeen markey dugsigii sare dhameeyeen? UU-lataliyeyaasha marwalba waxey dib u raacaan ardaydii hore u qalin jabisay. Qofwalba oo 15-17

## Talo wanaagsan

### Carurtaada waxay doonayso ogow

”Aad bay muhiim u tahay inay caruurta go’aanku iyaga ka soo go’o, hadiikale aad bay u adkaanaysaa inay taclintaas sii wadaan.”



sano jir u dhexeeya waa inuu waxbarasho helaa, shaqo ama wax qabad oo balan wada galeen UU-lataliye ha, wa muhim inad carurta ka war heyso.

Dhalinyarada cawinimada helay oo tababar shaqo jobcenterka u diray, ayaa heli kara lataliye la taliya waxbarashada. Waydii jobcenterka si caruurtaada loo la taliyo.

*Waa maxay tababarka shqada ku saabsan?*
Jobcenterka ayey qasab ku tahay inuu siiyo tababar shaqo carurta 30 jir ka yar, oo laga cawiyo waxbarashada. Tababarkaa ayaa ka caawinaya si uu taclinta u dhameyo. Dhalinyarada waa in aad loogu dhiiro galiyo inay waxbarashadooda sii wataan, wixii cawinimo ah na waa in ey helikarayaan isla markaaba.

Dhalinyaro ayaa jira oo aan diyaar u ahayn taclinta sare. Laga yaabo ineynan helin wali go’aan ama eynan garanayn waxa ay doortaan ama waxaa ka maqan itixaano. Waxaa soo dhan waa in laga caawinkaro si ay taclinta sare u helaan, ha noqotoba wax aqriks, qoritaanka, xisaabta ama hanoqoto in tababar loo geeyo meel shaqo, si uu usoo qanco ama usoo arko taclinta kadib shaqadu sidey tahay.

Dhalinyaradu si kala duwan eye taclinta u heysan karaan, markaa waa inuu jobcenterka ca caawiyaa

*Wa maxay cawinamad tacliinta?*
Qofka ya yar 30 jir, oo aan taclinta sare heysan ayaa heli kara cawinimadaas (lacagta ceyrta ah qaata).

Taclinta lagu caawinayo wuxuu helayaa SU. Dhalinyarada aan wali dhamaystiran tacliin ayaa cawinimo dheeraad ah heli kara, si loogu caawiyo inay tacliinta dhamaystiraan.

**Talo wanagsan- walidinta is dhafsadan**
Waa maxay talad wanaagsan ey walidinta is dhafan karan marka ey noqoto carurta taclintooda? Waxaanu weydiinay Avan Jamilla, aa carur leh, oo doortay calin. Taladooda boga hose eye ku qoran yihiin-iyo waragda ku lifaaqan.

# Tacliinta dhalinyarada

## Tacliinta aad sii wadikarto markaad glaska 9 ama 10 aad dhamayso waxaa la yidhaahdaa.

Taclinta dhalinyarada oo ey aadadaa:

- **Xamaali.** Markaad imtixa-anka xamalinimada dhamayso ayaad raadsankartaa shaqo ah rinjiile, cook, koronto ama horaad tacliintaada u sii wadi kartaa.
- **Taclinta tugsiga sare.** Markaad dugsiga sare dhamayso ayaad kusii dari kartaa tacliinta sare, si aad shaqo sare oo aad u wanaagsa u heli lahayd u hesho.

Taclino kale ayaa jira hadii ey caruurtaada iminka diyaar u ahayn inay markay glaska 9 ama 10 dhameeyaan ama shaqada xamaliga ama waxbarashada sare sii wadaan. Waxaad kala xiriirtaa UU, idin caawinaya ama plan idiin sameynaya walidka iyo carurtaba si aad iskula wada heshiisaan mustaqbalka caruurta.

Sawirkan hoose wuxuu idin-tusayaa fursadaha kala duwan ee glaska 9 ama 10 jira.Sawirka glaska aha wuxuu tusayaa waxbarashada in shaqo lagu helo ama taclinta hore usii wado. Faah faahin intaa ka badan halkan ka eeg.

**Shaqo ama tacliin sare**

↑ ↑ ↑

| Shaqada xamaliga ah, o kale oo socda | Taclinta Dugsiga Sare | Waxbarashada kale |
|---|---|---|
| 2-5 sano | 3 sano | Skoleka wax soosarida |
| Tusale: fuundi, koronto, kaaliye | Htx | Egu |
| | Hhx | KUU |
| | Stx | STU |
| | Hf (2 sano) | AVU |

↑ ↑ ↑

**Glaska 9aad ama ka 10 aad**

## Talo wanaagsan

### Su'alo furan

"Su'alo waydii, xageed ka helaysaa caruurtaada qof ey la hadlaan, sidaad wax uga ogaato. Tusaale, inantaydaan weydiiyey waxay jeceshahay ama ay ku faraxsantahay inay ka shaqayso mustaqbalka. Su'alahaas oo kale, sidaasaan su'alaha u waydiiyey inanta dhalay"



**Waxbarasho diyaar ma u tahay? Sidan ayaa ardayga loo qiyaasayaa?**

**Khibrad**

- Ardayga waa inuu khibrad u leeyahay siduu u bilaabo waxbarashada sare ama dugsiga sare. Waxaa meesha la keenayaa qof aqoon u leh suduu ardayga u caawiyo, sii ahaan ardayga 4 iyo wax ka yarhaysta glaska 8aad, siday waxbarashadooda dusha loogu soo qaado.

**Personal**

- Ardayga niyad ma u hayaa inuu wax barto?
- Ardaygu masul ma yahay oo ma ismaamulikarayaa, tusaale, casharada ma ka soo bixikaraa?
- Ardaygu diyaar ma uyahay xiisadaha?
- Wakhtiga la rabo glaska ma imanayaa?
- Ardaygu si wanaagsan miyuu uga soo fakaray tacliinta?

**Social**

- Ardayda kale ma la shaqaykarayaa waxna maku soo kord-hinayaa?
- Wax ma fahmayaa mana xishmaynayaadadka kale?
- Ardayga dulqaad ma leeyahay, dadka kalena mala shaqay-karaa?

**Arjiga ogolaashaha**
Meeshan arji marka hore u dir optagelse.dk, iyo kama dambaynta ah ee codsiyada ka yimaada dadka dhalinyarada ah ee 9aad iyo 10aad. Glaska ah 1 da MARS. Ardayda glaska 9 ama 10 aad, waxay dalbal karaan marwalba. Arjiga waa inuu ku soobnaadaa ardayga waxa uu doonayo inuu barto iyo waxa uu shaqaado haystoba.

*Ardayga waxbarasho diyaar ma u yahay*
Haduu ardayga diyaar u yahay iyo walidkiisana ay ils af karteen inay arjiga soo diraan. Macalinka waxbarashada ka caawinaya ayaa qiyaasaya inuu ardaygan diyaar u yahay waxbarashada uu soo codsaday glaska 9 ama 10aad waxa ka danbeeya.

*Haduunan ardayga diyaa u ahayn waxbarasho*
Ardayga aan waxbarashada diyaarka u ahayn, tijaabo ayuu galayaa si loo qiyaaso bahidiisa. Imtixaana waa macquul in laga qaado, haddii ardayga ka soo baxdo shuruudaha gelitaanka ah. Waayo ardaygaasi wuxuu hoostagayaa UU-ardayda caawiya, kuwaasaana ka masul ah arjiga ardayga soo diray.

*Dhalinyarada 18 ilaa 25 jir u dhaxaysa*
Dhallinyarada u dhexeeya 18 iyo 25 sano oo bilaa skol ah, waxay caawinimo ka helayaan UU-arday caawiye ah. Arjiga in loo ogolaado ama inkale waxaa masuul ka ah optagelse.dk.

*Arjiga jawaabtiisa*
Ardayga jawaab ayuu ka helaayaa machadka uu arjiga u diray – waxaana loo sheegaya machadka uu yahay, taariikhda marka la gaadho fasaxa xagaaga.



# Waxbarasho ku saabsan shaqo – waxbarasho aad ku helayso shaqo

Waxbarasho ku saabsan farsamada gacanta, sidoo kale electiga ama kaaliye caawinta. Farsamada gacanta waxay kuu sii sahlaysaa inaad mustaqbalka in uu ardayga shirkad furan karo.

Farsamada gacanta Denmark waa pregtig iyo cashoro la dhigto. Ardayga waa inuu cashka ku isticmaalo shaqada ama meesha uu pragtiga u joogoba iyo mustaqbalkaba. Waxaana loogu talagalay inuu ardayga shaqo ku helo.

*Farsamada electiga waxaa la baranayaa, xisabaadka iyo calamadahooda, waana inuu samaykaro korontada.*

*Kaaliye caawinta waxaa labarnayaa, inuu meherada ilaaliyo, dadka wax iibsanayana si wanaagsan sida loola macaamilo.*

*Tusaalooyin dheeraad ah oo ku qoran bogagga soo socda.*

**Sidanay tacliinta u dhisan tahay**
Farsamada gacanta waxay leedahay wakhti loogu talagalay inuu socdo, oo loogu tala galay in profetional ah ama skolka aad ka soo shaqayso intaad skolka dhiganayso. Ardayga ayey mas'uuliyada sarantahay inuu soo helo shaqada proktiga ah inkasta uu iskolka caawinayo. Waxaa jira skolo aad shaqadaa lahayn ama khasab ahayn inuu ado ardayga.

Laba qaybood ayey ka koobantahay koorsada:

*Koorsada hore:*
*Maadoyinka hore iyo jihadoda.*
Koorsada hore ee ardaygu qaadanayo waa marka uu soo dhameeyo glaska 9aad ama 10naad. Hadii uu ardayga blaabo farsamada gacanta wakhti danbe, waa inuu kasoo bilaaba glassyada ugu hooseeya ee koorsdaas.

Dhalinyarada markay arjiga diraan, waa inay afartan koorsadood mid mid doortaan:

- Engineering , dhismaha iyo gaadiidka
- Care , Caafimaadka iyo barbaariye
- Office , ganacsiga iyo adeegyo shaqo ganacsi
- Cuntada , Beeraha iyo khibradaha

14 ka bari ee ugu horeeya ee farsamada gacanta, dhalinyarada waa inay doortaan jihada ay doonayaan 6 bilood ee ugu horaysa. 6 bilood ka bacdi waa inay doortaan jihada rasmiga ah ey doonayaan. Tacliinta ama waxbarashada skolka la qaato ayaa dhalinyarada caawinaya si ay go'aankooda ugu fududaado.

*Koorsada 2aad:*
*Waxbarashada kusii fiicnow*
Waxbarashada waxaa loogu talagalay taclinta uu ardayga doortay, tusaale, Nijaar ama Koronto. Takale waa inuu ardayga khibrad u leehayay ama wax ka yaqaanaa maadadaas, si loogu ogolaado tacliintaa.



## Talo wanaagsan

### Su'al: Maxaad ku wanaagsantahay?

"Marmar, caruurta kuma wanaagsana inay sheegaan waxay ku wanaagsanyihiin, Hadii aad ka fakarto, 3daxda wax ay ku fiicanyihiin.



**Maadada Sare**
Maadooyinka kala duwan ee farsamade gacanta waxay kala leeyihiin semestaro kala duwan, ardaygu waa inuu kasoo baxaa sharudaha intuunan semestarka horeba bilaabin:

- Ardaygu waa inuu basaa semestarka 2baad marka hore.
- Samestarka hore waa inuu ardaygu sharuudaha galita-anka skolka kasoo maxaa.
- Wa inuu ardaygu la leeyahay balan qof shaqo siinaya ama inuu diyaar u yahay iskolka inuu ka shaqeeyo.

Ardaygu horuu kabilaabikarayaa samestarka koobaad hadii shaqo ama practice loo balan qaaday.

Farsamada Gacanta waxaa ugu danbeeya imtixaan.

**Waxbarashada inay socoto**
Tacliintaasi waxay socotaa 2 ilaa shan sano iyo bar. Skolada farsamada gacanta ayaa kala duwan. Ardaygay ku xidhantahay inuu labasano kabacdi dhameeyo ama inuu sii dhamaystirto tacliina. Waxay ku xirantahay ardayga xiisihiisa, kartidiisa iyo dadaalkiisaba.

Shaqaday hadhow helayaan, waxay ku xirantahay inta semester ay dhameeyeen. Waxaa cado ah, inay helaan mushahar wanaagsan hadii ay wada dhameeyaan farsamada gacanta oo dhan.

**EUX: Farsamada Gacanta iyo Dugsiga sare imtixaankiisa**
EUX waa dugsig Farsamada Gacanta oo lagu daray imtixaanada dugsiga sare. Sanadka asaaska ahi ee dugsiga sare waxaa loogu talagalay hal Farsamada gacanta ah. EUX waxaay kuu taraysaa inay kuusii gudbiso tacliinta sare ee jamacadeed sida dugsiga sare oo kale.

Hadii aad doorato EUX, tacliintaasi way ka dheertahay hadii aad doorato farsamada gacanta. EUX shahaadadiisha hadaad hesho, waxay la midtahay adigoo helay labada shahaadood ay kale yihiin dugsiga sare iyo ta farsamada gacantaba, oo markaa ardaygu wuxuu helayaa shahaadada farsamada gacanta iyo cadayn dugsi sare.

EUX waa fursad wax u taraysa farsamada gacanta. Had iyo jeerba waxaa waxbarashadaa ka mid ah, waxbarashada baacmustariga, okonomiga ama waxbarashada xafiisyada.

**Sidan ayaa laguu qaabilayaa,**
Sada skolka farsamada gacanta laguu qaabilayo, waa inuu ardayga:

- waa inuu skolada hose,
- waa inuu dansk iyo xisaabta imtixaanadooda kenaa 2,0 ugu yaraan dhamaantood ama
- Waa inay noqdaan diyaar haday soo dhameeyeen glaska 9, 10 ama ay sanad kale kusii dareenba.

**Mushaharada iyo SU**
Ardayga waxaa la siinayaa SU, waxbarasho dugsi inta uu ardayga yahay.

- Wardayga wuu rajicinkaraa SU semesterka horeba, haduu ardaygu 18 ka weyn yahay.
- Mushahar ayuu helayaa haduu ardaygu shirkad soo dirtay semesterka koobaad.

Hadii uu ardaygu iskolka tababar u tago, iskolkaa sinaya mushahar loogu tala galay ardayda.

**Faaf faahin ku saabsan SU, ka eeg ug.dk**

Tusaale kala duwan ee farsamada gacanta hoosta ka eeg iyo inta shaqo ey helikaraan, meesha hoose.

# Ardaygu wuxuu ka qayb qadanayaa farsamada gacanta

**Madoyin kala duwan wey isla shaqaynkaran-natijo cadayn ku tusaysa.**
Guryo cusub ayaa la dhisayaa, ama la casriyeynayaa. Dhismo ama Doogdhigid waxay u bahanyihiin casharo kala duwan. Natijadana laga arkayo sanadada badan ee soo socda - oo ey noqonayso hareeraheena.

**Doog- iyo nashqada dhismaha**
Lamiga, guryaha iyo brijka. Injirirka dhismaha waa specialist shubka. Injirirka dhismaha howshisa waa kontrolka dhismaha shubka iyo shubabka kale ee kala duwan meesha yaala,

**Fundi**
Dhagax iyo marmar, saqafka iyo musqusha. Fundi nimada waxaa la bartaa in la akhriyo sawirka oo guri sawirkaa la ga dhiso. Waxaad baranaysaa sida saldhig caaryada iyo dhulka loo dhigo, saqafka loo saaro, mamarka guriga loo wada dhigo.

*Mansurs walidkii ayaa jeclaystay inuu yeesho taclin kale. Taas ay tahay wey u ogolaadeen wuxuu isaga jecleystay, iminkana aad bay ugu faraxsanyihiin. Aaad ban u jeclaa inaan noqdo injiriir, laakiin waxaa maqlay taclinta fundi nimada. Waa tacliin teori iyo braktig ba leh. Maanta shirkad aan leeyahaan heytaa, aadna waan ugu faraxsanahay heerka an joogo.*

**Korontoole**
Power iyo nal, network iyo aalado. Waa in koronto in lagu rakibo si ay awod u hesho, telecommunication iyo Information techlogiba. Waxay u baahantahay tacliin dheer iyo in aad specialist tahay oo aad tacliintaas ka helayso.

*Seelam waxuu soo bartay koronto. Sida ardayda kale waxuu jeclaa inuu noqdo injireer sidaa daraded ayuu dugsiga sare u bilaabay. Sidii aan rabay ma'aynan noqon. Macalinka ardayda caawiaan iigula taliyey inaan farsamada gacanta bilabo oo aan dhigto korontada, aad baan uga helay, oo waxaan shaqo ka helay meeshii aan tababarka u tagay oo aan aad ugu farxay markaan qalinjabiyey. Kalsoonidayday dusha u soo qaaday markaan dhameeyey, hadaan diyaar u ahay inaan tacliintii sii wado.*

**Farsama beeraha guryaha**
Beeraha, wadooyinka, qubuuraha. Beeralaydu waxay daryeelan meelaha cagaaran oo kuwo cusub dhigaan. Qofka waa aqon u lahaada, dhirta(jeedaha) iyo jiridaha oo uu si haboon oo qurux badan iskugu keena.

**Najaar**
Dhulka looxa ah, saqafyada, mararka qaarkod goobta shaqdu waxa weeye meelo sare ama faaradohoda. Nijaaradu waxay ka shaqaayan, badana daaqadaha iyo saqafya guryaha . Waxbarashadan waxa la magacaaba maadooyinka alwaaxa, dhismaha waxbarashada.

**Qasabadle yaqaan**
Biyaha, kululaynta iyo hawada guryaha. Aqoon yahankan shaqadiisu waxay ku sabsantahay, inu qorsheeyo, qiimeyo, diyaariyo xisabta ku baxaysa hawsha iyo desaaneyo waxa la qabanayo. Farsamo ya qanka qasabadahu waa inu xifrad ku la haada xisaabta iyo fisikiska iyo farshaxanka qacanta. Farsamo yaqaanka qasabadaha qaarkod waxay xidhidh badan la leeyahay macaamisha oo badana waxay leeyihin shirkado



**Ganacsi kuu gar ah? Badana dadka farsamada qacanta bartaa,waxay doortan inay noqdan madax banandan.**

*in la badalo,qasabadaha iyo tuubooyinka, ee waxa ka loo laga shaqeeya nashqadeenta guryaha tuubooyinka la galinayo, isago caawinaya injineerada iyo kuwa dabka galiya guryaha.*

*Mohsen,*
*Ardayga qasabadaha sameeya*

iyaga gar u ah. Qarna waxay ka shaqeeyan shirkadaha dhismaha ama shirkadaha injinernimada. Waxbarashadan waxa lagu magacaaba tamarta tuubooyinka.

*Saaxibaday qaar ka mid ah, ayaa igu la kaftama yidhahda waxa tahay nin musqulaha ka shaqeeya. Lakin dhooshan ka qoslaa, waxan ugu jawaaba, anaa idinka lacag badan. Farsamadan qasabadaha maaha kaliya*

**Tusaale:**
**Lacagta la qaato bishi**

| | |
|---|---|
| Wastad/Fuudin | 31.813 kr |
| Dabgaliye/Korontiste | 35.050 kr |
| Farsamada beeraha guryaha | 28.525 kr |
| Nijaar | 31.903 kr |

**Ardaygu wuxuu ka qayb qadanayaa farsamada gacanta**

## Farsamada gacanta

Farsamada qacantu waxay ku dhisantahay farsamooyikii dadkii hore laga soo gaadhay. Iyado lagu kabayo farsamada casriga ah. Taasi waxay sahlaysa in la sameeyo tiro badan iyo kuwaalati fiican.

### Farsamo yaqanka alabta guryaha

Albaabada, Daaqadaha iyo alaabta guryaha. Farsamo yaqankan wuxu wax ka qabtaa dhimaha cusub iyo dayactirka. Shaqadan waxay ka dhacda badana ,faaradaha, goobaha dhismaha iyo guryaha macmiisha. Farasamdan waxa magacaaba aqoonta alabta guryaha.

### Cunto sameeye/Dabaakh

Kugu wuxu ka shaqeeya Hudheelada, Maqaaxiyaha, kijooyinka waa weyn iyo dhakhaatirta. Kugu wuxu ka masul yahay cunta iyo in ay cuntadu tahay cunto la cuni karo. Farsamdan waxa lagu magacaaba Gastronome.

### Dhagax qore

Farsamda dhagax qoristu waxay ku sabsan tahay, dhagaxa qurxin tiisa. Qeybta muhiinka ah ee shaqadan waxa weeye talobixinta macamiisha. Waa in ay doortaan dhagaxa saxda ah, oo aad leedahay awoodo farshaxanimo oo aad ku xaliso hawsha. Farsamadan waxa la bilaaba shirkad kuu gar ah.

### Farsamada biraha

Birta,Firinjar, maarta iyo caaga. Shaqadan waxa muhiim ah doorashada b
Irta iyo farsamada saxda ah ee shaqada lagu fulinayo. Farsamo yaqaanka birahu waa inu leeyahay xirfado wanaagsan, qiyaas fiican iyo dareen farsamo.

*Xaashi farsamadan biraha ayuu bartay. Waxan ku helay goobta toobabarka sadex bilod gudohood. Gebtii koowad ee waxbarasha waan dhameeyey. Farsamadan maha uunn bir laxan, waa farsamo lagu barto farsameeta teknoolajiga, teknoolaji-alxanka ah iyo farshaxanimada farsamada. Aniga oo kaliya ayaa famliga ka bartay farsamada qacanta, aad iyo aad famligu farasayihin.*

### Farsamada aqonta qalabka yar yar

Kamaradaha, saacadaha, sawaarka.
Farsamadan  waxa badan kala shaqeeya qalabka yar, matalan saacadaha furfuristooda. Farsamo yaqankan waxa uu ka shaqeeya badana shirkadaha soo saara qalabka yar yar iyo mishiianda yar yar.

### Farsamada Shaybaardhka ilkaha.

Ilkaha Dabah, galaas iyo caaga. Farsamadan waxa la sameeya ama la dayactiraa ilkaha macmalka ah. Farsamadan waxay u baahan tahay , hubsiimo, xirfad farsamo iyo fiirsasho dheer.

**Tusaale:**
**Lacagta la qaato bishi**

| | |
|---|---|
| Farsamada alabta guryaha | 31.681 kr. |
| Cunto sameeye | 30.767 kr. |
| Dhagax-qore | 31.895 kr. |
| Farsamada biraha | 33.073 kr. |
| Farsamada qalabka yar yar | 35.660 kr. |
| Farsamada Shaybaardhka ilkaha | 31.554 kr. |




## Talo wanaagsan

### U ogalaashaha rabitanka dhalinyarada.

Maxa muhiim ah, inu waalidku u furfurnado dhalinyarada waxay rabaan, laga yaaba inu waalidku dhalinyartooda wax barasho gar ah la doonayo inay bartaan lakin waxa muhim ah inay dhalinyarta waxay rabaan ixtiraaman. Oo dhalinyarta waxay rabaan ku taageran.



**Ardaygu wuxuu ka qayb qadanayaa farsamada gacanta**

## Teknoolajiga casriga ah iyo takhasuska

IT, roobadka iyo warshadaha casriga ah ayaa iminka si xoogan u socda. Inta badan waa automatic oo waxa loo baahan yahay dad aqoon u leh si ay wax u wadaan ama u soo saraan.

**Farsamada makaanimada mishiinada**
Mishiinada warshadaha waxax haboon in ay mar walba socdan, hadii ay mar istaagan khasaare badan bay keenta xaga dhaqaalaha. Farsamo yaqaankan khaladka hela, dayactiraa, mishiinadana wuu xidhaa. Waa in mar walba gaadh laga haya iyo in la la socda wixii casri ah. Waxbarashdan waxa lagu magacaaba Farsamada makaanida mishiinada.

**Farsamda caagaga**
Baalalka marawaxadaha dabaysha, doonyaha waaweyn iyo qalabka yar yar ee mishiinada. Farsamadan caaga waxa laga shaqeeya soo sarka caaga, waxa la kontrolaa mishiinada iyo qalabka. Waxa muhiim ah in la doorto saxa ah ee hawsha ku haboon. Waxa kale oo haboon in la la socda wixii casriya ee cusub.

*Maalin baa waxan u arkay joornalka, shirkad raadinaysa farsamo yaqanka cagaga. Waligey farsamda hore u ma maqlin, goobtii shaqada ayan soo boqday. Aad yo aad ban xiiseyey, marka waxanu isku afgaranay in an marka hore gacanyare noqdo, lix billod ka dibna waxan billabay waxbarashada anoo is waligaa ka soo biximaysid hawshan. Lakin waan ku guulaystay, waaa shaqo xiiso leh, malin walbana wax baa kuukordhaya, qalab cusub bad baran ama mishiin cusub bad baran.*

*Søren, Farsameeyaha cagaga*

**Farsamada makaanimada warshadaha**
Matoorada maraakibta, wiishashka iyo mishiinada warsahdaha. Waxa muhiim la mishiinada la farsameeyo, inta badan mishhinadu waxa laga komtrolaa kombiyuutaro. Farsamdan waxa lagu barta sida mishiinada loo xidhxidho ama loo dayactiro.

Waxbarashadan waxa lagu magacaaba makaanimada warshadaha.

**Farsamda qalab sameenta**
Jaritanka iyo qaloocinta biraha iyo caaga. Shaqan waxa lagu saaro qalabka  casriga ah. Waxa la istic maala mashiinada CNC, mashiinada ayaa farsameeya wax oo la adeegsada. Wxabarashadan waxa lagu magacaaba Qalab sameenta.

**Warshada hilinka**
Hilinka lo'da , weylalka iyo adhiga. Hilinhu waa warsahdo casri ah, goobta shaqadu inta badan waa warshadaha. Waxbarashadan waxa lagu magacaaba Warshada hilibka.

**Farsamada subaga iyo farmaajoda**
Caano, subag iyo farmaajo. Farsamadan waxa laga shaqeeya soo sarista waxyaabaha caanaha laga sameeyo. Waxaad helikartaa mas'ul inaad ka noqoto qayta productionka ama aad ka shaqayso qaybta quality control

**Tusaale:**
**Lacagta la qaato bishi**

| | |
|---|---|
| Farsamada makaanimada mishiinada | 37.221 kr. |
| Farsamada caagaga | 32.845 kr. |
| Farsamada qalab sameenta | 34.196 kr. |
| Warshadaha hilibka | 33.024 kr. |
| Farsamada subaga iyo farmaajoda | 31.884 kr. |

**Ardaygu wuxuu ka qayb qadanayaa farsamada gacanta**

## Adeegga macmiisha, iibka iyo service-ka

Waxa muhiim ah in ad macmiisha qacmo furan ku soo dhaweysid iyo in ad adeega saxa ah siisid. Adoo tixgaliya aqoonta aad leedahay shayga aad iibinaysid ama adeega aad iibinaysid.

### Kaaliyaha iibka

Cuntada, dharka iyo korontada. Kaaliyaha iibku wuxu ka shaqeeya dukaanada. Muhimada shaqadu kow waa macmiisha, labo alabta dukanka oo si sax ah u taala, si ay ugu fududaato macniisha. Dukaamada badanaa wax walba waa lagu iibiyaa.

*Fasalka 10 ka dib, Rosa waxay bilowday dugsiga ganacsiga, ka bacdina waxay toobobar ka heshay Matas,markii waxbarashadu u dhamaatayna shaqo siiyey. Maamulaha dukkanku wuxu sheegay in an xirfad ku leeyahay wax iibinta, macmiishuna raali bay iga tahay. Taagar kaygu waa in an maamulo dukaan, ka bacdina reer dhiso.*

### Hiliblaha

Hilibka iyo cuntada diyar ah. Hilib la han wuxu jarjaraa hilibka waaweyn oo uu ka sii iibiya dukaamada. Taa waxa dheer, macmiishay la taliyan, hilibkay qiimeyan, waxay diyaariyan cuntada diyar ah.

### Timo jare

Timo jaris, koofeerin, kalarin. Farsamada timo jarida waa isbadal badan tahay, waxa ,uhhim ah inad la socotid casriga, haday noqo xaga timo jarista ama xaga teknoalajiga. Mar walba soo ban dhigtaa wixii cusub, adoo tixgalinaya macmillka timihiisa.

*Marku Öznu doortay farsamada timo-jarista, waalidkii wey ku taageeren iskasto ay jeclaayin inu bilaabo dugsisare. Hooyadi subaxdii cuntada uu qaadanayo ayey u diyaarin jirtay, aabihina wuxu u iibiyey mooto isa ugu fududayso socdaalka. Iminka Öznu wuxu u shaqeeya Timo-jare.*

### Aqoonta  xisaabiye bangi

Dhaqaale qorsheen, dhaqaale keedin iyo maalgalin. Xisaabihu wuxu la taliya macmiisha bangiga isa goo tixgalinaya macmiilka wuxu rabo. Marka uu macmiil donayo dayn, wuxu xisaabiyuhu baadhitan ku sameeye macmiilka dhaqaalihisa si wuu u qisaaso inuu macmiilku ka bixi karo daynta. Aqoontan waxa lagu magacaaba waxbarasha dhaqaalaha.

### Kabayeeri

Cuntada, cabitanka iyo serfiska fiican. Kabayeerigu maalintii oo dhan wuxu xidhidh la leeyahay macmiisha, sidoo kale inuu waji furan ku soo dhaweeya uu si fiican u raaligaliye. Kabayeerigu waa inuu mashqul nimada iyo degdeg diyar ahaada.

### Aqoonta soo dhawayta

Hudheelada, goobaha siminarada iyo shirdaha waa weyn. Soo dhaweeyihu waa qof  muhiim ah, waa inu qof walba la hadli kara, qof wadani ah iyo ajaanib ah, luqaduhu waa muhiim. Cagaha dhul ku ahayn waa muhiim marka mashquulka la yahay.

**Tusaale:**
**Lacagta la qaato bishi**

| | |
|---|---|
| Kaaliyaha iibka | 29.966 kr. |
| Timi jare | 28.098 kr. |
| Kabayeeri | 30.692 kr. |
| Soo dhaweeye | 30.113 kr. |



## Talo wanaagsan

### Is weydii halkad joogto shan sano ka bacdi?

Waxan weydiiyey wiilkayga, waxa kalo u raaciyey markad meel aad isku tilmamto yaad ka bacdi dib isku noqon karta.Waa su'alshaa inaad is waydiiso 5 ta sano kabacdi meesha aad doonayso inaad joogto? Si aanu dib isugu noqono si aanu u ogaano meesha aanu howsha ka bilaabayno, inankaygana aad buu u fahmay.



**Ardaygu wuxuu ka qayb qadanayaa farsamada gacanta**

## Dabiici, dhirta iyo xayawaanka

Waa in aad muujiso ixtiraam xaga dabiiciga ah, markad damac day in ka faa'idaysato dabiiciga. Waxa iyana meesha tal oo muhiim ah, qoorsheenta wax soo saarista, adoo tixgalinaya wakhtiga.

**Beeralay**
Xoolaha, qalabka iyo dhaqaalaha. Wax qabad shaqo oo ku xidhan hadba xili sannadeedka. Qayb muhiim ah oo ka mida shaqadu waa sidii  loo qorshayn lahaa shaqada iyo daayactirka mashiinada iyo dismayaasha. Qofka cilmiga beeraha leh wuu u shaqayn karaa cid kale meherad uu is u leeyahayna wuu ka shaqaysan karaa. Waxa kale oo uu ka shaqayn karaa inuu mashiinada ku qodo, beereo ama dalaga beeraha ka soo jaro. Tacliinta waxa la yidhaa wax-barashadda beeraha.

*Nawaz denmark waxa uu yimi sannadkii 2000. Nawaz waa qaxooti ka soo jeeda Afganistan. Afganistan qoyskiisu qaar badan oo ka midi ihi waxay ka shaqaystaan beeraha laakiin Nawaz waa kii ugu horeyay ee qaata wax-barashadda beeraha*

**Wax soo sarka beeraha**
